"Important school information. Please have someone translate."

SPANISH - Informacion importante de la escuela -- por favor que alguien traduzca.
NEPALI - स्कुलको महत्वपुर्ण जानकारी हो- कृपया कसैलाई अनुवाद गर्न लगाउनुहोस्
SOOMAALI - Akhbaar muhiim ah oo ka socdo dugsiga. Fadlan qof haa kuu turjumo.

Machadka Internetka Dugsiyada Magaalada Westerville
(Westerville City Schools Virtual Academy)
Waxaa loogu talogalay Darajooyinka K-12
Kor Ka Eegidda Brograamka
Sanno Dugsiyeedka 2020/2021

Dagmo ahaan, waxaan la soconaa in cudurka faafa ee COVID-19 uu qoysaska qaar ugu baaqo in ay raadsadaan siistem waxbarasho kale. Sida uu faray Guddiga Waxbarashada Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville (Westerville City School District Board of Education), waxaan ku faraxsanahay in aan bixino Machadka Internetka Westerville (WVA, Westerville Virtual Academy) sida qorshe loogu talogalay waalidiinta iyo ardayda.

SIDA AY U SHAQEYSO

Machadka waxaa laga helaa hababka waxbarashada internetka halkaas ay ardayda ku qaataan iyo ku dhamaystiraan koorsooyinkooda, baddalkii ay in badan toos ula shaqeyn lahayeen macalinka fasalka. Macalimiinta Westerville waxay meel fog ka kormeeri doonaan la socoshada horumarka ardayga, waxay diyaar u ahaan doonaan in ay ka jawaabaan su'aalaha, iyo waxay darajo siin doonaan qiimeynta ardayga.

Sida qeyb ka tirsan machadka, ardayda ka soo qeybgashay:

- waxaa lagu qori doonaa dugsiga xaafadda ay tagaan xagga diiwaan gelinta iyo warbixinta.
- waxaa fursad loo siin doonaa in ay qaataan adeegyada raashinka, cuntadana lagu qeybiyo meelaha loogu talogalay.
- waxay awood u yeelan doonaan in ay ka qeybgalaan hawlaha ka baxsan manhajka dugsiga xaafadooda.
- waxay qaadan doonaan darajo ku saleysan dhamaystirka iyo aqoonta maadada sannad dugsiyeedka. Darajooyinka horumarka waxaa la soo gudbin doonaa waqtiyada darajo bixinta joogtada ah.

Qoysaska doorta machadka waxaa lagu qori doonaa qorshaha internetka ugu yaraan samastarka kowaad ee sannad dugsiyeedka 2020/2021.

Tagidda dugsiga internetka waa muhiim sida tagidda fasaladii hore. Si uu u "tago," ardayga waa in uu horumar ku filan gaaro todobaad kasta. Kuma filna in la galo keliya. Ardayda uma baahna in ay galaan waqti go'an maalin kasta. Waxaa lagu tallinaa in ardayda iyo waalidiinta qabsadaan waqti joogto ah maalintii si ay u dhamaystiraan shaqada dugsiga. Hubinta horumarka la gaaro todobaad kasta waxaa la siin doonaa waalidka iyo ardayga ka qeybgala habka dijitalka.

TAARIIKHDA MUHIIMKA AH

<u>Qamiis, Luulyo 23</u>

- Macluumaadka brograamka iyo Linkiga Diiwaan Gelinta Internetka waxaa E-mail loogu diraa Dhamaan Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha WCS

- Macluumaadka Brograamka (Program Information) iyo Koobiga Warqadda (Hard Copy) Foomka Diiwaan Gelinta Loo Diro Dhamaan Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha (kuwa aan awoodin in ay buuxiyaan diiwaan gelinta internetka)

Arbaco, Luulyo 29

- Maalinta ugu Dambeyso ay Waalidiinta Cunugga (Caruurta) ku qoraan Machadka Internetka (Online Academy)

Agoosto 17-31

- Waalidka/Ardayga waxay Shirka Internetka la Galaan Macalinka ku Qoran

Talaado, Sateembar 1

- Taariikhda Bilowga Tababarka Ardayga K-12

ADEEGYADA TAAKULEYNTA LA SIIYO ARDAYDA

Macalimiinta, la-talliyeyaasha dugsiga iyo shaqaalaha taakuleynta adeegga la xariira kaddib (sida Fududeeyeyaasha/shaqaalaha Ardayda Barata Luqadda Ingiriisiga iyo kuwa Hibbada leh (Gifted and English Language Learner facilitators/staff) ee ka socda dugsiga ardayga waxay sii wadi doonaan in ay bixiyaan hoggaamin iyo taageero toos ah hadba sida loogu baahdo.

Ardayda ku jirta IEP_yada, Ku-Takhasuseyaasha Faragelinta (Intervention Specialists), shaqaalaha la xariira adeegga, iyo maamuleyaasha kiiska ayaa iyaga la shaqeyn doono si ay u siiyaan tababar si gaar ah loo samayay, iyo fududeyn iyo baddalaad ku saleysan baahida gaarka uu qabo ardayga sida IEP_da ku talliso. Dhamaan shaqaalaha waxay ardayda ku qoran 504_ada siin doonaan fududeyn iyo baddalaad xagga dhamaan qorshaha dugsiga si loo taageero horumarka ay ka gaaraan manhajka waxbarashada guud.

QORSHAHA IYO KOORSOOYINKA LA BIXIYO

Ardayda Machadka Internetka Westerville (WVA, Westerville Virtual Academy) waxay adeegsan doonaan ilaha manhajka (Calvert/ Edmentum xagga K-5 iyo Apex xagga 6-12) si ay u yimaadaan fasalada, wadaagaan fikrado iyo macluumaad ay la qeybsadaan macalimiinta, helaan waxa ku jira, akhristaan, qoraan, cilmi baaris ku sameyaan, weydiiyaan iyo ka jawaabaan su'aalaha, ka shaqeyaan mashaariicda, iyo dhamaystiraan su'aalaha gaaban iyo imtixanaadka. Gelitaanka Calvert/Edmentum- https://tinyurl.com/CalvertInfo ama Apex https://tinyurl.com/ApexLearnInfo waa meesha iyo sida aad u imaan doontid dugsiga maalin kasta.

Xasuusin: Koorsooyinka ku qoran Kataloogga Koorsada Apex (Apex Course Catalogue) - https://tinyurl.com/ApexCourseCatalogue waxaa heli kara ardayda ku jirta darajooyinka 6-12 hase ahaatee koorsooinka waa in ay ahaadaan kuwo laga qaato brograamka tababarka wiji ka wiji ee horay laga qaatay Dugsiyada Magaalada Westerville (Westerville City Schools). Maadooyinka ku jiro labada waxbarasho waxay la socdaan yahiin Heerarka Waxbarashada Ohio (Ohio's Learning Standards).

- **DUGSIGA HOOSE:** Ardayda dugsiga hoose waxaa lagu qori doonaa koorsooyinka muhiimka 4 (Ingiriisiga, xisaabta, sayniska iyo daraasaadka bulshada) ee heerka darajada ku habboon. Intaas kaddib, waxay qaadan doonaan labo xullasho sida ku qoran linkiga soo socda: https://tinyurl.com/WVAElemCourseOverviewByGrade.
- **DUGSIGA DHEXE:** Ardayda dugsiga Dhexe (MS, Middle school) waxaa lagu qori doonaa 4ta koorsooyinka muhiimka ah (Ingiriisiga, xisaabta, sayniska iyo daraasaadka bulshada) heerka darajada ku habboon sida ku saleysan waxa uu ku biiriyo la-talliyaha dugsiga. Ardayda ku qoran in ay qaataan fasalada aruursan ee xisaabta iyo daraasaadka bulshada waxay awood u yeelan doonaan in ay sidaas sameyaan marka ay adeegsadaan Apex. Fadlan dooro labo maadooyinka la xusho si laguugu qoro - mid halkii samastar. Ardayda waa in aysan qaadanin in ka badan iskudarka 1.0 koorsooyinka la xusho, iyo waa in ay qaataan buundada dugsiga sare (HS, High school) xagga koorsooyinka qaar. Si aad u heshid sharaxaadda koorsada la xusho, tag: https://tinyurl.com/WVACourseElectiveSyllabi
- **DUGSIGA SARE:** Ardayda dugsiga sare (HS, High school) waxaa lagu qori doonaa koorsooyinka laga soo codsaday habka jadwalka hore lana soo raaciyay waxa uu ku biiriyo la-talliyaha dugsiga. Koorsooyinka qaar, waxaa la heli karaa Sharafta (Honors) iyo fasalada AP. Waxaan jadwalkaada WVA la saffi doonaa jadwalkaada hore ilaa inta suurtogalka ah. Marka la saffidda aan la heli karin,

waxaa kula soo xariiri doono xubin ka tirsan shaqaalaha si loo helo fursado kale. Si aad u gashid barnaamijka koorsada, tag: https://www.apexlearningvs.com/course-catalog

Koorsooyinka Buundoyinka Dheeraadka ee Kulliyadda (College Credit Plus) waxaa heli kara ardayda ka qeybgasha. https://tinyurl.com/WCSCCP

LINKIGA DIIWAANGELINTA BROGRAAMKA

Qoysaska raba in ay isku qoraan waa in ay buuxiyaan hal diiwaan gelin halkii cunug. Diiwaangelinta waxaa leyska rabaa ugu dambayn maalinta Arbacada, Luulyo 29, waxaana laga dhamaystiri karaa linkiga internetka loo samayay, waxaa lagu soo diri karaa boostada, ama qof ahaan waxaa laga dhamaystiri karaa cinwaanka iyo taariikhda iyo waqtiyada hoos ku qoran.

Linkiga Diiwaan Gelinta: **https://tinyurl.com/WVARegistration2020**

Diiwaan Gelinta La Soo Diro: Laga soo shabadeeyo boostada ugu dambayn Talaado, Luulyo 28
Diiwaan Gelinta Lagu Geeyo Gacanta ama Qof Ahaan La Geeyo:

- Academic Enrichment Center, 336 S. Otterbein Ave, Westerville, OH (Ka soo horjeedka Westerville South HS)
- Taariikhda/Waqtiyada
  - Isniin, Luulyo 27 laga bilaabo 7:00 AM ilaa 4:00 PM
  - Talaado, Luulyo 28 laga bilaabo 7:00 AM ilaa 4:00 PM
  - Arbaco, Luulyo 29 laga bilaabo 7:00 AM ilaa 8:00 PM)

SU'AALAHA? Email: wva@wcsoh.org